

Noolaha Dhamaantii

Djibouti City, 2007

Waxa uu kaga hadlayaa abwaanku nolosha iyo waxa uu aadmigu kaga duwanyahay xayawaanka noocyadiisa kale. Waxa uu ku nuuxnuuxsanayaa dadku inay wax qabsadaan oo ay xoogsadaan una dhididaan oo isu hawlaan horumarkooga habsami u dhaqankooga, Isagoo dhan walba ka tusaya xag diineed xag waaya aragnimaba.

Waxa uu carrabka ku adkaynayaa Qaddarku inaanay u fahmin dadku hawlyaraysi ee ay u gartaan sida uuyahay. Oo ah waxan la dhaafikarin dadaalkuna waajib yahay.

Noolaha dhamaantii
Kuwa socod ka dhaabee
Ku dhaqaaqa caghiyo
Ka gurguurta dhoobada
Dhaalayda duushee
Hawadaa ku dheeshiyo
Kuwa biyo ku dhuuntaba
Naflahaa dhigiisa ah
Dad ku waxay ku dhaafeen
Cagli dheelitiranbuu
Rabigay ku dheehoo
Xayawaan dhugaag iyo
Dhaqan iyo nidaamloo
Is dhagaysta weeyee
Dhaantada ku soo durug.

Dhakafaarka dunidiyo
Dhaygagiyo umuurahan
Kolla dhabana hayska ah
Kolla dhoolla qosolka ah
Sida loola dheelaan
Dhab agalay war Keego
Murtibaaka dhibicdee
Dhalintiyoo dad waynuhu
Hakusoo dhawaadeen.
HOrta dhaaxa abidkeed
Dheegoow aduunyadu
Waxay kuula dhaqantaa
Hadba saad ka dhigatoo
Noloshuba dhamaanteed
Waxa ay kadhadata
Dhaqdhaqaaqa lugihiyo
Adimada dhexdoodoo
Qofba wuxu kadheefaa
Hedel kuu udhiibtiyo
Dhidid kiisa kaliyoo
Hadba dhaqashadiisiyo
Dhugashada dantiisuu
Ka helaa dhigeedee

Nika hawl kadhuuuntee
Dhayalsada dantiisee
Halgankii dhabta ahaa
Dhacadiidka doortaa
Kolbashay dhaliiloo
Kudhabara nasiib iyo
Qadarbaa wax iidhimy
Waxa laysku dhaafiyo
Dhalan maaha guushuye
Dhabbadeeda loo maro

Aan dhawr tilmaamood
Dhagta kuugu sheege
Markaloo dhibtooda
Dharagiyo wanaaggiyo
Dhaqashada lagaadhaa

Unknown

Dhaydiyo gadhoodhkiyo
Dharab lagu caweeyaa

Oo malab ladhuubiyo
Dhanfaruurta geeduhu
Intay soo dhawaadaan
Carrab kiyo dhanxanagiyo
Dhabanada yimaadaan

Calaf lagama dhuuntee
Qalinkana dhabacashiyo
Orod laguma dhaafee
Dhawaqaan kuleeyyahay
Waxa uuka dhiganyahay
Kama dhimo ilaahay
Dhibic qudha adoomaha
Dhididkiyo xaqoogee
Dulmi wuu ka dhaartee
Nafta dhiira galiyoo
Dhalanteed ha aaminin.
Wayse dhici karaysaa
Adigoo dhacdaal iyo
Daal iyo dhib soo maray
Inadwaydo dheeftii
Subagaad ka dhamilayd
Ama kuu dhigmi lahaa

Balse waxad ku dhaaftaa
Ma ogtahay dhirbaaxadu
Ma horseedo dhimashee
Dhabbaday usherette
Qofka dhaga adaygee
Dhugan waaya taladee.

Dhibta lagu hongoobiyo
Fashalkii hadeer dhacay
Nika raga waxuma dhimo
Cashirbaabu kuu dhigay
Cilmibuudhab kuubaray
Qaladkiyo dhaliilaha

Kudhex jira naftaade
Kugu dhuumanaayuu
Iska dhaaf ku leyahay.

Shaqadaad dhantaashiyo
Wakhtigaad ku dheeshuu
Ku tusaa dhib keedoo
Fursadii kudhaaftuu
Tan dambee dhiggeeda ah
Hadhayalin ku leeyahay.
Ma dhamaanin duniduye
Maantaba wixii dhiman
Ku dhaq suu ku leeyahay,

Ha dhawaysan raaxada
Adigoon u dholondholin
Mudu badan u dhuubnaan
Dhaxan iyo haraad marin
Dhabaddanada j iilaal
U kalihin dhagtii hore
Qorax duna ku dhabannayn
Dhayal laguma gaadhee
Noq geesi dhabar adag

Dhabaqsiga shaxaadkiyo
Ii dhiibta qayrkaa
Ha ku noqon dhadhama raac,

limaanku waa dhare
Hugu yaanu kaa dhiman

Dhinac kale ka eegoo
Dhari aan bislaanayn
Inad dherarsataa roon
Rajo aan dhamaanayn
In ladhawri ceeb male.
Balse waxan la dhaygagay
Nika ceelka dhaafee
Ka wahsaday inuu dhuro
Ama diiday dhooqada

Unknown

Eedhoomuhuu siday
U dhaqdhaqay xareeddee
Cirka dhoolka joogiyo
Dhado roob ka sugayee
Surmi dhuuntu roortee
Ubadkiina dhaa yidhi
Kuu dhiibay adigee
Horta maanu dhoohnay,

Haldhigeegu wuxu yahay
Nafta dhaamash ha utumin
Kula soco wixii dhab ah
Kolla dheemman doo doon
Kolla dhari wax kuu gala

Kolla dhaqasho raadcee
Kolla dhuunigoo qudha

Waxa jira nin dhaw loo
Ka hortaga dhibaato
Dhagar kala bad baadshoo
Xasilooni dhaliyoo
Dhulka tola dillaacee
Adigoon dhantaalayn
Midna dhinaca saarayn
Dhexdhexaadi aadmiga

Isku soo dhawee labo
Midba dhacan ku oodna
Naftu waxay ka dhiidhido
Ama dhiiggu kaa kaco
Dhulka lagama waayee
Yaanay cadhadu kaa dhigin
Wiyil dharastay oo kale.

Hana tuurin dhagixii
Dib usoo dhabbacankara
Dhuuxaaga j abinkara
Ee aan ku dhaafayn.

Kolla dhogor shabeel xidho
Kola dhixidhka naagaha.

Dhulka miro u soo dhacay
Way kaaga dhawyiin
Kuwa dhoorka saarane
Ha dhaafin meel sare
Hadda dhuumo kuma odhan
Dhibyarayso kuma lihi
Dhawaqaan ku leeyahay
Waxa uu kadhiganyahay
Dhalanteed ha aaminin
Dabadeedna ha isdhigan
Hana odhan dharaartaa
Hebalbaa dib iidhigay
Ka kalaa wax ii dhimay
Hay dhansiinin anigana
Marmarsiiyo dhicikara

Dhigaa lama yaraystee
Kibir ha iska dhaadhicin
Dhiddigiyo laboodkaba
Bulshadaad la dhaqantahay
Haka noqonin dheeraad,

Dhalintiyoo dadwaynaha
Ku lahaw ammaan dhaba

Diinteena dhawrsoon
Hideheena dhaxalkaah
Labadaba ku dhehnaw

Runtu dhaxan magaydee
Hal dhuuman waligaa
Beentana ka dheeraw.

Lax dhukani abaar moog
Dhulka laguma joojee
Dhacddadiyo umuuraha
Nin u dhuun dalooloo

Unknown

Dhabagala hadaadtahay
Waxba kuuma Dunstan.

Dhawaqiyo codkaagana
Sida tanag bud lala dhacay
Dhaw dhawdu waa ceeb
Lama ciyo sidii dhool
Ama waysha dhiinka ah.
Hooyadii ku dhawrtee
Bilo dhawra uurkiyo
Dhexda kugu sidaysee
Dhuuniga ka soontee
Dhalmada iyo fooshii
Sankaraad dhadhamisee
Dabadeed dhaqaaliyo
Kalgacaylo xeel dheer
Kugu dhooba kuustee
Dhabta kugu habaysee
Dhistay waaxyahaagee
Dhaqankiyo Asluubtiyo
Anshaxaaga dhidibtee
Ku dhansiisay garashada
Eedhaaxa Abidkaa
Inad dhaafto Qayrkaa
U dhamaamaxaysee
Kugu dheehan adigee
Dhiiggeega kaajecel
Iyo dhaageheegee
Dhibta kula nacaysiyo
Aabihii ku dhalay ee
Aadku dhaadanaysee
Lagaa dheegay adigee
Kugu habay dhifkiisiyo
Dhididkii naftiisee
Hagarkaaga dhaartee
Dabka kuugu dhici jiray
Labaduba nikaan dhiman
Way kaa dhursugayaan,
Haka dhimin xaqoogii
Cidi uma dhamaysee

Ha dhayalin karaankaa
Waligaa dhaqaalee
Dhibri hadalka aadtidhi
Garabkana u dhaadhici
Ka dhagayso waanada
Haka nixin dharaar qudha
Eray dhiifle ka ogaw.

Culminant adoon dhigan
Qofna kuma dhashee garo
Dhaxal yaanu kula noqon

lima dharabta jiifiyo
Waayeel dhafooracad
Midna lagama dhaafine
Jeeroodka dhimataan
Waa Bad aan dhamaanine
Wax la yidhi ka dhaansada.

Murti dhaxal galaa tidhi
Hadaad dhimato geeridu
Marbay nolosha dhaantaa
Waxa ay ka dhigantahay
Markay .dhiida, gaadhee
Dhudhun iyo awood iyo
Dhumuc la isku sheegtee
Dulmi lagu dhawaaqee
Cadliguna dhamaadee

Qaranimadu dheelido
Waddankuna dhaxmoodee
Calankaagu dhaadhaco
Waa inad ka dhiidhido
Dhiillada shisheeyaha
Waa inad kadhicisaa,

Diintaada dhawrsoon
Dhulka lama huraan ka ah
Gobanimada dheegga ah
Danta dhabar ahaaneed

Unknown

Waa inad udhimataa,

Dhayal maaha caashaqu
Dhacdo weeye qaaliya
Marka dhinac la eegana
Noloshuu ka dhiganyahay
Dhaqankiyo tafiirtaba
Dhidib kooga weeyaa,

Dhankalaase loo rogay
Waxa hadlka loo dhigay
Dhirindhiiris qodaxdii
Lagu soo dhawaynjiray
Dhabbo la isku soo maro
Dhunshada sarbeebta ah
Been iyo dhadhama raac
Iyo baahi daba dhaw
Dharag aan calool jirin
Dhuunyaal markaa qudha

Dhulka loola kala kaco
Dhab ahaana xaajadu
Dhakaday ku socotaa
Dhagarbaase laga galay
Dhaqankiyo xishoodkii
Dhadhanxumada joogtana
Dheeh kaama saarree
Hablo dhaamash ha utumin
Haku dheelin gabadh ugub
Axdi beena ha udhigin
Adigoon dhamaynayn
Ubax dhiina ha ululin
Qaarbaa dhalaanee
Adiguna ha dhama,siin
Haka dhumiixaqiiqada
Qalbigeeda hau dhicin
Ha u dhaafm kaydii
Hantigeeda dhawrsoon
Ha u qoomin dhuuryada
Dhidarkiyo waraabaha.

Adiguna kuwaa dhaan
Illayn waa dhiggoodii
Hablahaad la dhalatee
Nabsi taada haw dhigin
Iyo dhaxal magayda ah
Gafka aad dhokobisaa
Kugu suga dhadhaarkee.

Dhismihii arooskana
Markaad dhaadashada guud
Dhalankeega gaariyo
Dhankastaba ka eegteed
Dhubbad-qaadka sheekada
Dhoollaha ka qososhaan
Adoon sharafta dhaawicin
Hiddeheena dhooqayn
Xiisuhu dhabkaayahay
Ku dhadhabaya oo jecel
Dhabankiyo gabbaatiga
Waa inad ka dhiibtaa
Gobanimada dhawrtaa
Xilkana dhabarka saartaa.

Waxba yaanan dhaantada
Kolba erayo dhayla ah
U salaaxin dhoorkee
Hakad baan u dhigayaa.

Dhibicduna waxaytahay
Doqonbaa dhagaatiga
Xadhig dhuunta loo sudho
Dhudhumada ku sidatee
Geesigu ma dhuuntee
Dharabtuu ka muuqdaa.

Aar kuna ma soo dhoco
Halka Ood la dhababee
Wuxu soo dhirbaaxaa
Meeshii dhaleexsane
Iska dhiibi shaqalada.